



## BUFFALO PUBLIC SCHOOLS

### Office of the Superintendent

65 Niagara Square Room #712 City Hall

Buffalo, New York 14202

Phone (716) 816-3575 \* Fax (716) 851-3033

krinercash@buffaloschools.org

Maarso 12, 2020

Gacaliye Bulshada Iskuulada Dadweynaha Buffalo:

Iyada oo ku saleysan hagida Wakiilka Caafimaadka Degaanka (Erie County), Iskuulada Dadweynaha ee Degmada Buffalo waxay kansali doonaan dhamaan safarada gagaaban ee iskuulka kafaala-qaado (field trips) iyo safarada kale walaaca la xiriira Fayraska Koronaha COVID-19 awgiisa. Waxaa isla markiiba dhaqangalaya xannibaadda safaradan ku saleysan iskuulada, waxay quseeyaan ardayda iyo shaqaalaha, waxayna socon doontaa illaa iyo ogeysiis dambe. Macallimiinta, tababarayaasha iyo la-taliyaasha oo safarkooda arrintan saamaysay waxaa si toos ah u ogeysiin doonaa maamulahooda iskuulka.

Waxaa intaa sii dheer, laga bilaabo isla markiiba iyo illaa ogeysiis dambe, waxaan joojineynaa dhammaan munaasabadaha iskuulada ay abaabulaan ee ku kooban wax ka badan ilaa 50 qof. Kuwaas waxaa ku jiraa munaasabadaha iskuulku maal-geliyo oo ka dhaca iskuulka dhexdiisa ama meel ka baxsan.

Duruufaha ku xeeran masiibada cudurkaan ku faafay adduunka waa kuwo aad khatar u ah oo maalin walba is beddelaya. Waxaan qaadi doonaa ficil deg deg ah anagoo raacayna xaaladaha duruufaha isbedbeddelaya, anagoo raacayna hagida saraakiisha caafimaadka dadweynaha, dadaal aan ugu jirno xaqiijinta amniga qofkasta oo wax ka barta, ka shaqeeya iyo booqasho ku taga iskuuladeena.

Waxaan sii wadi doonaa inaan toos ula xiriirno dhammaan qeybaha ay quseyso sida duruufaha jira nagu khasbaan.

Si ixtiraam leh,

Dr. Kriner Cash  
Kormeeraha guud ee Dugsiyada